

KU KORINTA CARUURTA YAR-YAR WADDAN CUSUB:

Taageerada Waxbarashada Hore iyo Horumarinta Caafimaadka



Bridging Refugee Youth & Children's Services



THE NATIONAL CENTER ON
Cultural and Linguistic
Responsiveness



Buugg yarahaan, *Ku korinta Caruurta Yar-yar Waddan Cusub: Taageerada Waxbarashada Xiliga Hore iyo Horumarinta Caafimaadka*, waa mid laga keenay buugg yaraha asalka ah, *Ku Korinta Caruurta Waddan Cusub: Buugg yaraha La Faah-faahiyay*, wuxuuna diirada saarayaa qoysaska qaxootida ah ee waalidka u ah caruur oona kujira muddada waalidnimada tooska da'da 5. Wuxuu qoysaska siiyaa macluumaad kusaabsan: horumarinta caafimaadka; waxbarashada xiliga hore iyo diyaar u noqoshada dugsigay; iyo ku lug lahaanta qoyska uu ku lug leeyahay daryeelka xiliga hore. Buuggaan wuxuu kulminayaa labbada khibradood ee Dib u dejinta Qaxootida iyo Bilaabashada Hore ee caruurnimada xiliga hore/Bilaabashada Xiliga Hore ee bulshada, waxaana loogu talagalay ahaanshaha sida xog loogu talagalay dhammaan kuwa u adeegaya qoysaska qaxootida ah. Buuggaan waa qayb kamid ah Bilaabashada Hore-ee Dib u dejinta Qaxootida weyn *Iskaashiga Qalabka* loo sameeyay in kor loogu qaado iskaashiga u dhaxeeya Dib u dejinta Qaxootida iyo barnaamijyada Bilaabashada Hore. Dadaalkan wada jirka ah ee qiimaha leh oona hal abuurka leh wuxuu matalayaa iskaashiga u dhaxeeya Xafiiska Dib u dejinta Qaxootida (ORR) iyo Xafiiska Bilaabashada Hore (OHS); maalgeliyayaasha dowlada loogu talagalay Xafiiska Adeegaha Caruurta iyo Dhallinyarada Dib u dejinta Qaxootida (BRYCS), iyo Xarunta Caalamiga ah ee Dhaqanka iyo U jawaabida Luuqada (NCCLR).

Ku korinta Caruurta Yar-yar Waddan Cusub: Taageerada Waxbarashada Hore iyo Horumarinta Caafimaadka waxaa lagu diyaariyay hoosta Lambarka Deeqda. 90HC0001 ee loogu talagalay Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada Maraykanka, Maamulka loogu talagalay Caruurta iyo Qoysaska, Xafiiska Bilaabashada Hore (DHHS/ACF/OHS) ee ka ahaatay dhinaca Xarunta Caalamiga ah ee Dhaqanka iyo U jawaabida Luuqada iyo dhinaca Xafiiska Adeegaha Caruurta iyo Dhallinyarada Dib u dejinta Qaxootida (BRYCS). Nuskhada asalka ah ee buugg yarahaan, *Ku Korinta Caruurta Waddan Cusub: Buugg yaraha Faah-faahsan*, waxaa laga soo saaray sannadkii 2007 dhinaca Xafiiska Adeegaha Caruurta iyo Dhallinyarada Dib u dejinta Qaxootida (BRYCS) ee la socota taageero ka ahaatay dhinaca Xafiiska Dib u dejinta Qaxootida (ORR/ACF/DHHS) ee ah hoosta Lambarka Deeqda. 90RB0022.

Bayaanada, fikradaha, lagu caddeeyay buugg yarahaan waa mas'uuliyada kaliya qorayaasha buugga mana tilmaamayso fikrada ama ra'yiga qaybta Xafiiska Bilaabashada Hore ama Xafiiska Dib u dejinta Qaxootida

Xafiiska Adeegaha Caruurta iyo Dhallinyarada Dib u dejinta Qaxootida (BRYCS), mashruuca Adeegaha Qaxootida iyo Socdaalka, Shirka Maraykanka ee Wadaadada waa wayn ee Catholic ah (MRS/USCCB), wuxuu bixiyaa caawimaad tiknoolojiyad caalami ah ee “lagu buuxinayo faraaqaha” u dhaxeeya ururada guud iyo bulshada socdaalka iyo qaxootida ah, gaar ahaan meelaha waxbarashada xiliga hore ee caruurnimada iyo dugsiyada, iyo barnaamijyada dhallinyarada iyo daryeelka ilmaha. BRYCS waxay xoojinaysaa awooda ururada adeega ka jira guud ahaan Waddanka Maraykanka si loo xaqiijiyo horumarin guul leh oo kusaabsan qaxootida iyo caruurta marka dhow yimid, dhallinyarada, iyo qoysaska tooska tababar, latalin, il horumarin, iyo Bogg internet-kusalaysan rugta macluumaad isdhaafsigaa. Buuggaagta la daabaco iyo caawimaada farsamo ee BRYCS, ay kujiraan buugg yarahaan, waxay u hoggaansanyihiin mabaadi'daan soo socda:

- 1) Mida khuseysa qaxootida iyo caruurta soo galootida ah iyo dhallinyarada, waa muhiim in lagu caawiyo la samaynta xiriir xoogan oo wanaagsan hidi iyo dhaqankooda, in ay ilaaliyaan luuqadood hooyo, oona horumariyaan aqoonsiga laba dhaqan oo wanaagsan maadaama ay yihiin kuwo Maraykan ah. Midaan waxay ka dhigaysaa qoysasku in ay noqdaan kuwo xoogan sidaas darteedna waxay bixisaa taageerada ay u baahanyihiin caruurta si ay ugu guuleystaan waddankan.
- 2) Adeeg bixiyeyaasha, waa muhiim in loo isticmaalo habab qoyska iyo bulshada ay xuddun u tahay, oo ku dhisan awoodo qaxootiga iyo muhaajiriinta. Midaan waxay dad ku caawisaa in la kordhiyo fikradaha qoyska iyo bulshada oona lagu dhiso asal dhaqameed si loogu lug lahaado si guul leh looguna adeego qoysaska dadka marka dhow yimid.

- 3) Mida khuseysa bulshadaha, waa muhiim in la guubaabiyo wada shaqayn wax ku ool ah oo u dhaxaysa bixiyayaasha adeega. Midaan waxay caawinaysaa bixiyayaasha adeega badan in ay horumariyaan luuqad iyo adeego dhaqan ahaan munaasab ah, halka lagu caawinayo wakaaladaha dib u dejinta qaxootida helida adeego badan oo kala gedisan oo loogu talagalay caruurta, dhallinyarada, iyo qoysaska taageera horumarinta caafimaadkooda iyo isdhexgal mudo-dheer ah.
- 4) Mida khuseysa daryeelka xiliga hore iyo bixiyayaasha waxbarashada, waa muhiim in la bixiyo taageero iyo adeego munaasab u ah-luuqad ahaan-iyo dhaqan ahaanba kuwaas oo loogu talagalay xoojinta qoysaska iyo awoodooda si fudud loogu galo ama loogu helo adeego waxbarasho iyo daryeel xili hore ah. Midaan waxay ku caawinaysaa qoysaska in ay aqoonsadaan oona kaqayb galaan adeegaha tayada daryeelka xiliga hore kuwaas oo sida fiican ugu habboon baahida qoyska ee loogu talagalay daryeelka ilmaha iyo adeego kale halka lagu taageerayo waxbarashada xiliga hore ee caruurtooda iyo horumarinta caafimaadka.

Fadlan booqo www.brycs.org hadaad rabto macluumaad badan. BRYCS waxaa laga taageeraa dhinaca Xafiiska Dib u dejinta Qaxootida (ORR), Maamulka loogu talagalay Caruurta iyo Qoysaska, Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada, Lambarka Deeqda. 90RB0032. Xafiiska Dib u dejinta Qaxootida wuxuu taageeray soo saarida nuskhada asalka ah ee buugg yarahaan ee loogu talagalay qaxootida, buuggaas oo magaciisu yahay *Ku Korinta Caruurta Waddan Cusub: Buugg yaraha La Faah-faahiyay* (2007).

Xafiiska Bilaabashada Hore ee Xarunta Caalamiga ah iyo U Jawaabida Luuqada (NCCLR) waa qayb kamid ah nidaamka tababarka iyo caawimaada farsamo ee kajirta Xafiiska Bilaabashada Hore. Xafiiska Bilaabashada Hore ee Xarunta Caalamiga ah iyo U Jawaabida Luuqada wuxuu siiyaa bulshada Bilaabashada Hore macluumaad cilmi-baaris kusalaysan iyo wax qabadyo jawaabid dhaqan ahaan iyo xeelado lagu adkaynayo harumar wanaagsan oo waxbarasho iyo bulsho ah eeloogu talagalay caruurta ku kala duwan luuqad iyo dhaqan ahaan. Waxaa jira todobo fariimo oo muhiim ah kuwaas oo haga shaqada Xafiiska Bilaabashada Hore ee Xarunta Caalamiga ah iyo U Jawaabida Luuqada:

- 1) Dhaqanku waa mid adag, hab fir-fircoon oo muddo kadib isbedelaya oona lagu barto tooska korinta-ilmaha maalin kasta ah iyo xiriirada qofka weyn-iyo ilmaha uu la sameeyo qoysaska iyo daryeel bixiyayaasha/dhakhtarada ama shaqaalayaasha
- 2) Dhaqamada(dhaqanka) qoyska iyo luuqada(luuqadaha) guriga waa asalka caruurtoodu ay ugu guuleystaan nolosha iyo dugsiga
- 3) Caruurta yar-yar waa kuwo awooda in ay ka adkaadaan ama qabtaan luuqado badan
- 4) Caruurta ku shaqeeya dhaqamada badan oona ku hadla wax hal luuqad ka badan waa kuwo u faa'iida aqoon ahaan iyo bulsho ahaanba, waana kuwo qiimo u leh bulshada dhaqamada badan

- 5) Deegaan waxbarasho xili hore ah, oo tayo sare leh iyo khibraduhu waxay ku caawinayaan caruurta in ay sameeyaan ama bartaan luuqado badan oona ku shaqeeyaan wax ka badan hal dhaqan
- 6) Marka barnaamijyada EHS/HS iyo wada hawl-galayaashu ay la shaqeeyaan qoysaska iyo bulshada si ay u bixiyaan khibrado iyo deegaano waxbarasho tayo sare leh, oona ficil celis leh, caruurta waxay ku guuleysanayaan dugsiga, iyo
- 7) Muraajacayn joogto ah oo lagu sameeyo ficil celiska wax qabadyada dhaqanka iyo luuqada ka ahaada dhinaca EHS/HS wuxuu adkaynayaa barnaamijyada waxtarka leh oona arinta khuseeya ee loogu talagalay caruurta iyo qoysaska

Fadlan booqo <http://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/hslc/tta-system/cultural-linguistic/center> wixii kusaabsan macluumaad dheeri ah. NCCLR waxaa laga taageeraa dhinaca Xafiiska Dib u dejinta Qaxootida (OHS), Maamulka loogu talagalay Caruurta iyo Qoysaska, Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada, Lambarka Deeqda. 90HC0001.

Hordhac	iv	1.5 illaa 2 Sanno	16
Fiicnaanshaha Qoyska	I	2 illaa 5 Sanno	17
Daryeelka Hooyonimo	1		
Caafimaadka	2		
Nadaafadda	3		
Caafimaadka Afka	4		
Nafaqada Ilmaha yar	5		
Nafaqada	6		
Seexinta iyo Soo-kicinta	7		
Waqtiga-jiifka	8		
Ammaanka iyo Illaalinta	9		
Ammaanka Guriga	9		
Ammaanka Jidka	10		
Ammaanka Gaariga iyo Taksiga	11		
Ammaanka ka jira gudaha	12		
Ilaalinta Ilmaha	13		
Ka hortaga Dhibaataada	14		
Hagida iyo Edbinta	15		
Laga bilaabo dhallashada illaa 1.5 Sanno	15		
		Horumarka Maskaxda Caafimaadka leh	18
		Loo Diyaariyey in uu Wax Barto	18
		Waxbarashada Dareenka Badan	19
		Waxbarashada Xiliga Hore iyo Diyaaru Noqoshada Dugsiga	20
		Horumarka Dareenka iyo Bulshada	21
		Horumarinta Luuqada iyo Farbarashada	22
		Qaababka Waxbarashadu	24
		Horumarinta Aqoonta iyo	25
		Horumarka Jirka ah	26
		Ku xirida Kooxda Waxbarashada iyo Daryeelka Xiliga Hore	27
		Ku lug lahaanta Qoyska	28
		Khulaasada Sawirada	29
		Tixraacyada iyo Xoggaga	31
		Mahad Naq	40

Hordhac

Qoysaska qaxootida iyo soo galootida ah waxay u yimaadaan dalka Maraykanka ah ayaga oo leh awood hodantinimo waalidnimo, ayaga oo ku tiirsan dhaqanka, caadada, iyo khibrada qoyska. Sida ayba tahay inta badan waalidiinta ku nool dalka Maraykanka waxay isku dayayaan in ay noqdaan kuwo mas'uul ah oona abaabin leh, inta badana waxay nafsadooda ugu huraan si wayn si ay u siiyaan caruurtooda fursad ugu noolaadaan caruurtooda si ammaan iyo guul ah waddankan cusub. Isla markaasna, waalidiinta waqtiga dhow yimid waxay la kulmeen khasaare wayn, oo ay kujiraan waayid xubnahooda qoyska ballaaran, bulshadooda, iyo dhulkoodii hooyo, waxaana khasab ku ah in ay la qabsadaan dhaqamo cusub iyo qaab nololeed inta badan ka duwan waxa ay aaminsanyihiin oona sameeyaan. Qoysaska qaxootida iyo dadka soo galootida ahi sidoo kale waxaa khasab ku ah in ay ka adkaadaan caqabadaha wax ku oolka ah ee dhaqanka, iyo luuqada si ay u helaan adeegaha bulshada ay u baahanyihiin, halka ay adeegahaani ay tahay sidoo kale in ay oggaadaan waxa ku saabsan qoysaska waqtiga dhow yimid ee kusugan bulshadooda dhexdooda iyo sida ugu fiican ee loogu adeegi karo.

Waxaa jira faa'idooyin aan caadi ahayn ee loogu talagalay qoysaska qaxootida ah marka wakaaladaha bulshada iyo barnaamijyada Bilaabashada Hore ay u shaqeeyaan si wada jir ah.

Faa'idooyinka waxaa kamid ah:

- helida adeegaha horumarinta caruurnimada xiliga hore ee kusalaysan-xarunta midaas oo u oggolaata waalidiinta qaxootida

in ay shaqo u helaan sida ugu dhakhsiyaha badan kadib marka ay yimaadaan dalka Maraykanka;

- qiimeyn buuxda iyo adeego loogu talagalay qoyska oo dhan ee kusaabsan meelaha waxbarashada, nafaqada, caafimaadka, iyo caafimaadka maskaxda; iyo
- fursado ku lug lahaansho qoys kuwaas oo ku caawiya qoysaska in ay ku lug lahaadaan waxbarashada caruurtooda sidoo kale in lagu caawiyo in ay ka daba ordaan ujeeddooyinkooda waxbarasho iyo dhaqaale.

Dhab ahaantii dhammaan waalidiinta qaxootida wata caruur gaaraya illaa iyo 5 sanno jir waxay la kulmi doonaan shuruudaha u qalmiitanka dakhliga-kusalaysan ee loogu talagalay adeegaha Bilaabashada Hore marka ugu horeysa ee ay yimaadaan dalka Maraykanka. Maadaama barnaamijyada Bilaabashada Hore ay adkayso ama xooga saarto u jawaabida dhakhso ah oo loo jawaabo bulshadaha kala duwan ee si luuqad iyo dhaqan ahaanba ugu kobcaya waddankan, faa'idooyinka wada shaqaynta u dhaxeysa Bilaabashada Xiliga Hore/Bilaabashada Hore iyo wakaaladaha dib u dejinta qaxootida waa kuwo cad.

Bugg yarahaan waxaa loo sameeyay barnaamijyada Bilaabashada Hore/Bilaabashada Xiliga Hore, wakaaladaha Dib u dejinta Qaxootida iyo kuwo kale oo u adeega qaxootida iyo dadka soo galootida ah si loo adkeeyo ama loo habsado in waalidiinta dadka waqtiga dhow yimid ay haystaan macluumaadka aasaasiga ah ee ay u baahanyihiin ee khuseeya korinta caruurta laga bilaabo dhallashada illaa da'da 5 sanno ee lagu koriyo waddankan. Inkastoo

dadka waqtiga dhow yimid ay u arki karaan buugg yarahaan mid faa'iido u leh, waxaa aasaasi ahaan loogu talagalay shaqaalaha adeeg bixiyaha bulshada si ay ugu isticmaalaan si wada jir ah qaxootidooda iyo macaamiishooda soo galootida ah. Buugg yaraha waxaa loogu talagalay waalidiinta waqtiga dhow yimid ee leh heer hoose oo aqoonta luuqada Ingiriisiga ah iyo/ama heerar hoose oo aqoonta wax akhriska iyo wax qorida ah. Waloow xitaa fahanka adag loogu faah-faahiyay si fudud halkan, qaybta xogta (boggaga 31-39) wuxuu bixinayaa macluumaad lagu-helo-sifudud ee loogu talagalay bixiyayaasha adeega si uu u kabo arimaha muhiimka ah ama aasaasiga ah ee ku qoran gudaha buugg yarahaan. Intaas waxaa sii dheer, dadka isticmaala waxay heli doonaan "Waraaqo Naseexo" dheeraad ah oo qayb ka ah *Qayabaha Iskaashiga* laga soo saaray dhinaca BRYCS iyo NCCLR.

Si aad u heshid natiijada ugu fiican ee buuggaan, waxaan kutalinaynaa in loo isticmaalo buugg yarahaan hawlaha waalidka munaasabka u ah luuqad iyo dhaqan ahaan ama dhacdooyinka, waxaa la doorbidayaa in ay qabtaan shaqaalaha ayada oo ay la shaqaynayaan waalidka waqtiga dhow yimid ee khiibrabada leh iyo waalid u dhashay-Maraykanka ee ah isla jinsiyada waalidka kale. Hawlahaas oo kale waxay siin karaan waalidiinta soo galootida ah iyo qaxootida fursado ay ku weydiyaan su'aalo, isugu dayaan dhaqamo cusub, oona ku helaan taageero wanaagsan oo u fududeysa guuritaankooda ay u guuraan waddan cusub (fiiri qoraalka daabacan ee BRYCS *Waalid ku noqoshada Waddan Cusub: Qalab loogu talagalay La shaqaynta Waalidiinta Waqtiga dhow yimid*, <http://www.brycs.org/documents/upload/RaisingChildren->

[Handbook.pdf](#) wixii kusaabsan macluumaad dheeri ah oo khuseeya kooxda taageerada waalidka, ay kujirto manhajka iyo xogag kale).

Buugg yarahaan la faah-faahiyay wuxuu adkaynayaa ama xooga saarayaa lixdaan mowduuc ee soo socda:

- 1) **Fiicnaanshaha Qoyska:** Waalidiintu waxay mas'uul ka yihiin fiicnaanshaha ilmahooda. Midaana waxaa kamid ah hawlo kala duwan oo loo hurey ilaalinta caafimaadka, sida hab nololeedka caafimaadka, maaraynta cuntada, nadaafada, iyo caafimaadka afka.
- 2) **Ammaanka iyo Ilaalinta:** Waalidiintu waxay mas'uul kayihiin horjoogida caruurtooda ay ku horjoogaan dalka Maraykanka, dhammaan gudaha iyo banaanka gurigaba, iyo in laga dhigo kuwo ammaan ka ah dhibaato soo gaarta kahor dhallashada illaa tooska caruurnimada.
- 3) **Hagid iyo Edbin:** Hababka edbinta waxay ku kala duwan yihiin dhaqan ahaan. Qaababka ugu badan ee xiliga hore ee caruurnimada ee dalka Maraykanka waxaa kamid ah xoojin ama adkayn wanaagsan, dhaqanka dib u jiheynta (doorashooyinka jiheynta), iyo samaynta xeerar da'da-munaasab ku ah iyo xaaladaha ama duruufaha. Waa muhiim in la oggaado waxa laga oggolyahay dalka Maraykanka iyo waxa aan laga oggolayn si qoysaska waqtiga dhow yimid ula qabsadaan qaababka u shaqeeya qoysaskooda. Edbintu waxay aad u wanaagsantahay marka loo fuliyo si joogto ah iyo marka dhaqanka la doonayo ay sameeyaan waalidiinta.

4) **Horumarinta Maskaxda Caafimaadka leh:** Muddada xasaasiga ah ee horumarka maskaxda wuxuu dhacayaa laga bilaabo dhallashada illaa da'da 5 sanno. Waalidiintu waxay ciyaaraan door muhiim ah ee kusaabsan siinta caruurta yar-yar khibrado abaabin iyo kobcin sida xiriiro wanaagsan, la hadlid, ciyaarida ciyaaraha fudud, wax akhrin, kuciyaarida banaanka, iyo u isticmaalida hawlaha joogtada ah sida fursado waxbarasho. Khibradahaan hore waxay si wayn u saamaynayaan sida ay u horumarayso maskaxda caruurta iyo sida ay ula xiriirayaan adduunka tooska noloshooda oo dhan.

5) **Waxbarashada Xiliga Hore iyo Diyaar U noqoshada Dugsiga:** Waxbarashu waxay ka bilaabataa marka uu ilmuhu dhasho, 5-ta shanno ee ugu horeysana waa kuwo si wayn muhiim ugu ah guusha mustaqbaleed ee caruurta ay ugu guuleystaan dugsiga. Waalidiintu waa macalimiinta ugu muhiimsan uguna horeeya ee caruurta waxayna ku caawin karaan in ay caruurta horumariyaan jeceyl waxbarasho weligeeda ah ayaga oo si aan degdeg ahayn ula hadla ulana qaata waqti ay kula ciyaaraan kuna oggaadaan si wada jir ah waxyaabo cusub. Waxyaabaha joogtada ah ee la isticmaalo sida sariirta, qubeysiga, waqtiyada cuntada iyo bixitaanada loo baxo dukaanka khudaarta waxaa loo isticmaali karaa fursado wax lagu barto oona loogu xiriiro luuqada qoyska, qiyaamka, iyo waxyaabaha uu qofku aaminsanyahay.

6) **Ku xirida Kooxda Daryeelka Xiliga Hore:** Adkaynta kusaabsan ku lug lahaanta waalidka uu ku lug leeyahay daryeelka ilmaha iyo

bixiyayaasha waxbarashada xiliga hore waxay ku noqon kartaa mid ku cusub qaar kamid ah waalidiinta soo galootida ah iyo qaxootida. Waxbarashadu waxaa loogu arkayaa waddamo badan in ay tahay mas'uuliyada aasaasiga ah ee macalimiinta. Gudaha dalka Maraykanka, goobaha daryeelka ilmaha iyo waxbarashada xiliga hore waxay inta badan ku dhiiriyaan waalidiintu in ay si fir-fircoon ugu lug lahaadaan horumarka ilmahooda iyo waxbarashada si lamid ah gudaha barnaamijka. Midaan waxaa kamid ah tagida kulamada, shirarka waalidka-macalinka, in aad xoogaaga ka tabarucid xarunta, iyo kaqayb qaadashada waxbarashada guriga iyo hawlo kale.

Buugg yarahaan la faah-faahiyay waa shaqo socoto. Waxaan fikrado ka helnay bixiyayaasha Dib u dejinta Qaxootida, hoggaamiyayaasha ama madaxda qaxootida, bixiyayaasha Bilaabashada Hore/ Bilaabashada Xiliga Hore, khubarada horumarka iyo waxbarashada xiliga hore ee caruurnimada, iyo lafaahaanta qoysaska soo galootida iyo qaxootida ah guud ahaan samaynta buuggaan (fiiri qaybta Mahad naqa). Hadafkeenu wuxuu yahay in aynu sii wadno horumarinta buugg yarahaan si uu u ahaado mid cusub oona waxtar u leh wakaaladaha iyo dadka waqtiga dhow yimid ee ay ayagu u adeegaan. Waxaan sugaynaa in aynu helno war-celin kusaabsan sida buugga yar loo isticmaalay looguna tijaabiyay goobta loogu talagalay. Fadlan kusoo dir dhammaan tallooyinka kusaabsan daabacadaha mustaqbalka ah cinwaankan info@brycs.org ama midkan ncclr@bankstreet.edu.

Fiicnaanshaha Qoyska

Doorashooyinka nolasha caafimaadka leh—ay kujirto cuntooyinka, daryeelka jirkaaga, nadaafada, daryeelida ilkaha, iyo seexashada hurdo kugu filan—waxay dad ku caawinayaan in ay ka dhigaan qoysaska kuwo xoogan oona ku taageera kobcida iyo waxbarashada caruurta.


Daryeelka Hooyonimo

Si loogu caawiyo hooyada iyo ilmaha in ay caafimaad qabbaan, haweenka uurka leh waxaa khasab ku ah:

- In ay u booqdaan dhakhtarka qaab jadwaleed oo bile ah.
- In ay kala hadlaan dhakhtarka waxyaabaha kusaabsan uurka iyo
- In ay kala hadlaan dhakhtarka waxyaabaha kusaabsan u diyaar garoowga ilmaha.
- In ay cunaan cunto caafimaad leh oona qaataan fiitimiino khas ah
- Jimicsi sameeyaan.



Fiicnaanshaha Qoyska



Caafimaadka

Dhakhtarada iyo kalkaaliyaasha waxay caawin karaan caruurta marka ay xanuunsanyihiin. Caruurta sidoo kale waa in ay sameeyaan baaritaano-jooqto ah si uu dhakhtarka uga baaro kobcitaankooda una siiyo irbido tallaal ah.

- **Ubadka yar-yar** waxaa khasab ku ah in loo geeyo dhakhtarka si loogu sameeyo "booqashooyinka fiicnaanshaha-ilmaha" dhowrkii bilood ee kasta.
- **Caruurta jira 2 sanno iyo ka wayn** waxaa khasab ku ah in ay u tagaan dhakhtarka ugu yaraan halmar sannadkii.

Inta lagu guda jiro booqashada, dhakhtaradu waxay:

- Siin karaan ilmahaaga irbid lagu duro midaas oo looga hortagayo cudurada, sida hargabka ama jadeecada.
- Tijaabin ama baari karaan sida uu yahay araga ama maqalka ilmahaaga.
- Hubsan karaan in uu ilmahaagu u kobcayo si wanaagsan.
- Ka jawaabi karaan su'aalaha aad qabto ee kusaabsan caafimaadka ilmahaaga.
- Hubsan karaan in uu ilmahaagu diyaar u yahay dugsiiga.



Nadaafadda

In la dhaqo gacmaha in badan waxay kugu caawinaysaa adiga iyo caruurtaadaba in ay idin ka fogayso in aad xanuunsataan iyo faafinta jeermiska.

- Caruurta (iyo dadka waaweyn) waxaa khasab ku ah in ay ku dhaqaan gacmhooda saabuun iyo biyo kulul kadib marka ay dibada ka yimaadaan, kahor inta aan wax la cunin, iyo kadib marka la isticmaalo musqusha.
- Dadka waawayn waxay ku caawin karaan caruurta iyo ubadka yar-yar in ay gacmhooda dhaqaan.
- Caruurta waxaa la bari karaa in ay gacmhooda ku daboolaan afka marka ay qufacayaan ama in ay ku hindhisaan hoosta xunsuladooda.

Dhallaanka yar-yar: Maalin kasta dhaq meesha ay ku xirantahay xafaayada, wejiga, gacmaha iyo luqunta. Dhallaankaaga yar wuxuu u baahanyahay in loo qubeeyo 2-dii maalin ee kasta illaa 3-dii maalmood.

Caruurta ah 2 illaa 5 sanno jir: Caruurta waxay u baahan karaan in ay qubeystaan dhowrkii maalmood ee kasta, ama maalin kasta haddii ay wasakh gaarto ama marka ay isticmaalaan kareemka qoraxda kuleylkeeda laga marsado.

Isticmaal saabuun dhexdhexaad ah oo lamid ah shaambada ilmaha. Saabuunta kujirta maadada midibaynta iyo barfuunka waxay dhibaato u keeni kartaa jirka ama indhaha caruurta. Fiiri caruurta inta ay qubeysanayaan ee haka tegin keligooda. 15 daqiiqo waa waqti ku filan in uu ilmuhu ku qubeysto.





Caafimaadka Afka

Ilkaha ilmaha iyo ciridka waa in la nadiifiyo subax kasta iyo kadib marka cuntada la cuno.

- **Ubadka yar-yar:** Ku nadiifi ciridka iyo ilkaha hore 2 jeer maalin kasta maro qoyan oo nadiif ah; halmar kadib marka ugu horeysa ee aad wax siiso iyo marka labbaad kadib marka ugu dambeyso ee aad wax siiso.
- **Caruurta ah 1 illaa 8 sanno jir:**
 - Bilow in aad isticmaashid buraashka ilkaha jilicsan marka ay soo baxaan ilkaha dambe.
 - Ku caawi caruurta in ay ilkhooda buraashaan ama cadeeyaan.
 - U isticmaal kaliya dhibic yar oo la eg qiyaasta-digirta ee daawada ilkaha midaas oo aad mariso dusha, buraashka ilkaha qiyaasta-ilmaha ah.
 - Caruurta waa in ay booqdaan dhakhtarka ilkaha halmar ama labbo jeer sannadkii kadib da'da 1 sanno si ay u habsadaan in ay ilkhooda iyo ciridkoodu yihiin kuwo caafimaad qabba.

Biyaha tuubadu waa kuwo ammaan ah in laga cabbo Waddanka Maraykanka. Daawada kujirta biyaha waxay ka hortagaysaa in uu ilugu bololo.




Nafaqada ilmaha yar

Naas nuujinta

Caanaha naasku waa cuntada ugu wanaagsan ee ilmaha dhallaanka ah waxayna ku caawinaysaa in ay u koraan si wanaagsan oona ahaadaan kuwo caafimaad qabba. Waxaa wanaagsan in la naas nuujiyo ilmaha dhallaanka ah illaa 6 bilood ama ka badan. Meelaha ay dadka badan joogaan, in badan oo kamid ah hooyooyinka Maraykanka ahi waxay isku daboolaan buste ama waxay aadaan meel aan cidkale ka arkin si ay ilmahooda u nuujiyaan naaska.

Ilmaha dhallaanka ah ee aan la nuujin naaska waxaa khasab ah in ay cabbaan caanaha ilmaha uu kujiro maadada birta ah. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona nooca caanaha ilmaha la isticmaalayo. Raac tilmaamaha ku qoran baakada ama dhallada caanaha ilmaha si aad ugu darto waxa uu ka koobanyahay. Dhakhtarkaaga ama WIC wakaalada* ayaa kaaga jawaabi doona su'aalahaaga kusaabsan inta laga isticmaalo caanaha ama maadada lagu daro.

- **Dhallashada illaa 1.5 sanno:** Ilmaha dhallaanka ahi waxay wax ku cunaan "baahi" (marka ay gaajaysanyihiin). Midaana waxay tahay badanaa 1.5 illaa 3 saacadood kasta.
- **Laga bilaabo 4 illaa 6 bilood:** Ilmaha dhallaanka ahi waxay bilaabaya in ay cunaan cunto adag. Qadarka iyo kala duwanaanshaha cuntadu wuxuu si tartiib ahi u kordhayaan inta u dhaxaysa 8 iyo 24 bilood marka ay jiraan.
- **Ilmaha dhallaanka ah** waa in aysan cabbin cabbitaano sonkor lagu daray. Haddii aad siinaysid casiir, sii illaa 4 illaa 6 sacab maalintii oo casiir barkiisa iyo biyo barkeeda ah.



* Qaxootida dhowaanahaan dib u dejinta la siiyay waxay xaq u leeyihiin dheefaha dowlada ee loogu talagalay Haweenka, Dhallaanka iyo Caruurta (WIC). <http://www.fns.usda.gov/wic/>

Fiicanaanshaha Qoyska



Nafaqada

Cunida cunto caafimaad leh iyo ku haynta jirkaaga in uu shaqeeyo waxay ka dhigaysaa jirkaaga in uu caafimaad qabbo. Caruurta waxay u baahanyihiin in ay cunaan cunto fudud oo caafimaad leh iyo dhowr cuntooyin waawayn ah maalin kasta. In la ahaado qof shaqeeya oo fir-fircoon maalin kasta waxay sidoo kale ku caawinaysaa caruurta in ay sii ilaaliyaan haysashada miisaan caafimaad leh.

Cuntooyinka

In la wadaago ugu yaraan hal cunto maalin kasta waxay ku caawinaysaa qoysasku in ay isku soo dhowaadaan oona wadaagaan qiyamka qoyska iyo dhaqamada.

- Caruurta jira 1.5 illaa 5 sanno waa in la siiyo seddex cunto waawayn iyo labbo ama seddex cunto fudud oo caafimaad leh maalin kasta.
 - Cuntooyinku waa in ay kujiraan cuntada caadiga ah, sida hadhuudhka; (hilib ama digir) nafaqo leh; iyo khudaar badan
 - Caruurta waa in ay cabbaan 2 koob oo caano ah (ama caanaha digirta, caanaha bariiska, caanaha yicibka ama loowska) maalin kasta.
- Caanaha ay kuyartahay-baruurta iyo cuntooyin kale ayaa ku caawin kara dadka waawayn iyo caruurta waawaynba in ay ka hortagaan in uu qabto miisaan badan.
- Dhammaan caruurta waxay u baahanyihiin qurac caafimaad leh maalin kasta si ay u yeeshaan awood iyo tamar ay wax ugu bartaan.
- Cabbida biyo badan waxay u wanaagsantahay

Seexinta iyo Soo-kicinta

Waa u muhiim caruurta in ay helaan nasiino ku filan. Caruurta waxay u baahanyihiin hurdo si ay wax u bartaan oona diyaar ugu noqdaan

- **0 illaa 6 bilood jir:** Ilmaha dhallaanka ah waxay hurdi karaan 13 illaa 20 saacadood maalin kasta. Dhallaanka markaas uun dhashay waxay soo kacaan 3 illaa 4 saacadood kasta si ay wax u cunaan.
- **6 illaa 12 bilood jir:** Ilmaha dhallaanka ah ee jira da'daan waxay gam'i karaan kudhowaalkii 3 saacadood inta lagu guda jiro maalinta waxayna seexan karaan 9 illaa 11 saacadood habbeenkii.
- **1 illaa 3 sanno jir:** Caruurta waxay seexan karaan kudhowaalkii 10 illaa 13 saacadood maalin kasta. Waxay gam'i karaan oo hindho guduudsan karaan 15 daqiiqo illaa 1 saacad oo nasasho ah.
- **3 illaa 5 sanno jir:** Caruurta jirta da'dan waxay seexan karaan kudhowaalkii 10 illaa 12 saacadood habbeenkii kasta. Haddii ay seexdaan hurdo ku filan waxaa dhici karta in aysan hindho guduudsan maalinta oo aan qaadan wax nasasho ah. 15 illaa 30 daqiiqo oo waqti degan ah ayaa noqon kara mid wanaagsan.

Habbeenkii, qaar kamid ah waalidiinta waxay jecelyihiin in ay banaanka usoo saaraan dharka iyo waxyaabaha kale ee ay caruurta ugu baahan doonaan berito daryeelka ilmaha ama





Waqtiga-jiifka

Carruurta waxay aad ugu fiican yihiin jadwal joogto ah.

- Samee nidaam joogto ah oo lagu seexdo, sida in ilkaha la iska caddeeyo, in la xirto marada lagu jiipto, in loo akhriyo sheeko ama loo heeso kahor jiifka.
- Ka dhig caruurta in ay seexdaan habbeen kasta isla waqti go'an.

Kani wuxuu noqon karaa waqti wanaagsan oo aad la wadaagi kartid xasuusta fiican, sheekooyin, ama heeso dhaqankaaga ah carruurtaada.


Ammaanka iyo Illaalinta

Ammaanka Guriga

Qoysasku waxay baran karaan sida looga dhigo guryahooda kuwo ammaan u ah caruurtooda.

- Dhig ama saar waxyaabaha halista ah meel aanan caruurtu ka gaari karin.
- Ka dhig musqulaha, jaranjarooyinka, meelah dabka, kululeeyayaasha, iyo khaanadaha kuwo xiran ama kuwo aanan gaari karin caruurta.
- Ka fogee caruurta meesha aad wax ku fiiqeysid ama ku hoolaysid, ku jejebinaysid ama rinjiyaynta jajabka, gacmahana ku dhaq, alaabta, dhallooyinka, daaqaadaha iyo dhulka gaartay busta ama gabalada.
- U wac si dhakhso ah 911 haddii uu ilmahaagu laqo wax dhib keenaya, aanan kasoo kicin hurdada, ama aanan neefsan karin.





Ammaanka Jidka

Dadka waaweyn waa in ay ku caawiyaan carruurta in ay si ammaan ah ay jidka u gudbaan. Isticmaal calaamadaha lagu socdo, oona bar caruurta yar-yar in ay “joogsadaan, fiiriyaan, kadibna dhagaystaan” kahor inta aysan gooyin waddada.

Caruurta yar-yar waa in aanan weligooda u bixin banaanka ayaga oo aan la soconin qof weyn.

Ammaanka Gaariga iyo Taksiga

Kuraasta ammaanka ilmaha iyo suumanka kuraasta waxay badbaadiyaan nololsha dadka, waana kuwo loogu baahanyahay qaanuun ahaan in badan oo gobolada kamid ah.

Weligaaga hakaga tagin gaariga keligooda caruurta da'doodu tahay 10 sanno jir.

Dhammaan dadka waawayn iyo caruurta waawayn waxaa khasab kugu ah in ay isticmaalaan suumanka kuraasta. Caruurta yar-yar waa in ay isticmaalaan kursiga gaariga khaaska ah ee kuyaala kursiga dambe ee gaariga.


Qaabka loo fadhiisto ee kursiga gaariga waa mid ay kusalaysantahay da'da.*

- **Kayar da'da 1:** Marwalba u dhig kursiga gaariga asaga oo ku aadan kursiga gadaal (gadaal-u jeeda).
- **1 illaa 3 sanno:** Kuraasta gaariga waa in ay ahaadaan kuwo gadaal-u jeeda intiiba ay suurtoagal tahay.
- **4 illaa 7 sanno:** Caruurta waa in ay isticmaalaan kuraasta gaariga hore-u jeeda ee leh xakame.

Marka ay caruurta ka waynaadaan kursiga gaariga hore-u jeeda ee leh xakamaha, waxay isticmaali karaan kursiga xoojiyaha. Caruurta ka yar da'da 13 sanno waa in ay ku fadhiistaan kursiga gadaale.



* Weydii wakaaladahaaga degmada waxyaabaha kusaabsan xeerarka gobolka ee loogu talagalay meelaynta kursiga kana hubi kursiga gaarigaaga xadadka culeyska iyo dhirirka.



Ammaanka ka jira gudaha

Bar caruurta in aysan ka qaadan naca ama hadiyad dadka aanan aqoon u lahayn qoyskooda, una sheegaan qof weyn oo lagu kalsoonaan karo haddii qof ka dhigo in ay cabsadaan.

Haku cabbin sigaar agagaarka caruurta,



Ilaalinta ilmaha

Waalidiinta waxaa laga filanayaa in ay ilaaliyaan caruurtooda markasta. Deriska ma ilaalinayaan qof kale caruurtiisa haddii la wayddiisto oo ay dhahaan haa mooyaane.

Gobol kasta wuxuu leeyahay xeerar gooni ah ee kusaabsan horjoogida iyo ilaalinta caruurta. Halkan waxaa kuqoran qaar kamid ah tilmaamaha guud ee loogu talagalay caruurta yar-yarka ah:

- Si ammaan loogu dhigo caruurta yar-yar, waa in si dhow ugu horjoogaa uguna ilaaliyaa qof weyn dhammaan gudaha guriga ama banaanka gurigaba.
- Kuwa caruurta haya waa in ay ogyihiin sida loola xiriiri karo waalidiinta ama dadka kale ee waaweyn ee mas'uulka ah oona wacaan 911 haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.
- Caruurta ku nool Waddanka Maraykanka badanaa ma bilaabaan qof u haya ilmaha illaa uu ilmuhu gaaro da'da 11 ama 12 mana ilaaliyo ilmaha dhallaanka ah ama caruurta yar-yar illaa ay ka gaaraan 15 sanno jir.
- Weligaaga haka tagin caruurta yar-yar keligooda.





Ka hortaga Dhibaataada

U isticmaal caruurta qaabab wanaagsan oo hagida iyo edbinta ah. Weydii Xafiiskaaga Dib u dejinta Qaxootida ama barnaamijka Bilaabashada Hore wixii kusaabsan tallo iyo taageero haddii aad u baahatid.

Waxaa jira afar nooc ee ah waxyeellada carruurta:

1. **Xad gudub jirka ah:** Dhaawac loo gaysto ilmaha midkaas oo ka dhasha ficilo garaacid, laadid, qaniinid, gubid, ruxid ama qaabab kale oo dhib loogu gaysto ilmaha.
2. **Dayicid ilmaha ah:** Ka tagid, ama in aanan la daryeelin ilmaha; in aanan laga soo bixin baahooyinka caafimaad, waxbarasho, ama jireed ee ilmaha. In la ahaado sabool ma ahan mid ka dhigan in ay waalidiintu yihiin kuwo caruurtooda dayacay.
3. **Xad gudub galmo:** Fal galmo kasta ee u dhaxeeya ilmaha iyo qof weyn.
4. **Xad gudub dareen:** Qaylo soo noqnoqota, magac ugu yeeris, ama diidmada ilmaha.

Noocyadaan dhibaataada ah ee loo gaysto caruurta waa kuwo sharci daro ku ah Waddanka Maraykanka. Dadka qaar, sida macalimiinta, dhakhtarada, iyo shaqaalayaasha bulshada waa in ay soo sheegaan calaamadaha kuyaala ilmaha kuwaas oo noqon kara calaamad xad gudub ilmaha loo gaystay.

Hagida iyo Edbinta

Caruurta yar-yar waxay isticmaalaan qaabab badan oo ay dadka ugu sheegayaan waxa ay u baahanyihiin ama dareemaan. Caruurta yar-yar waxay u baahanyihiin in lagu caawiyo in ay sheegtaan dareemahooda iyo maaraynta dhaqamadooda.

Kuwaan soo socda waa tusaalooyin kusaabsan hagida munaasabka ah iyo edbinta da'da-kuhabboon.

Laga bilaabo dhallashada illaa 1.5 Sanno

Dhallaanku waxay noogu sheegaan waxa ay ugu baahanyihiin in aynu ku caawino ayaga oo ooya, oohin, ama in ay kujiid-jiidaan.

- U jawaab si dhakhso ah baahooyinka degdega ah (gaajada, bedelida xafaayada, hurdada, raaxada jirka ah, wehelinta, ihtimaam siinta).
- Sii jadwal joogto ah oo ku ciyaaro, loogu qubeeyo, cunto lagu siiyo, oona ku hurdo.



Hagida iyo Edbinta



I.5 illaa 2 Sanno

Intiiba ay caruurta sii korayaan oona kobcayaan, hagida iyo edbintu sidoo kale waa in ay isbedesho.

- Marka ay dhacaan dhaqamo aanan loo baahnayn sida (garaacid, laadid, qaniinid, caro daran), ka saar ilmahaaga xaalada kadibna isticmaal sharaxaad go'an oo cad sida, "Maya, qaniinyadu waa xanuun."
- Raadi waxa sababay dhaqankaasi.
- Ku hag caruurta hawl kale.
- Tusi caruurta qaab kale oo ay ku cabiri karaan nafsadooda ama ku heli karaan baahooyinkooda.



2 illaa 5 Sanno

Caruurta wuxuu muraalkooda u bedelmi kara si dhakhso ah waxayna muujin karaan caro daran ama xanaaq rabsho wata.

- Isticmaal hadalo gaaban oo fudud si aad ugu sheegtid waxa aad doonaysid.
- Raadi waxa sababay dhaqankaasi.
- Ku hag hawl ka munaasabsan tii hore. Tusaale ahaan, haddii ilmahaaga yar uu ku tuurayo caro ilmaha kale, waxaad ka fogayn kartaa weelka carada waxaadna siin kartaa kubad si uu ayada u tuuro bedelkii carada.
- Weydii ilmaha in uu kala doorto labbada hawlood ee kale. Tusaale ahaan, si aad uga fogaysid in uu gaaro wax jabaya, waxaad dhihi kartaa, "Ma jeceshahay in aad gaadiidka ku ciyaartid, ama waxaad rabtaa in aad samaysid oo aad xalisid xalxiraalaha?"
- U dhaqan qaabka aad jeceshahay in uu ilmahaaga u dhaqmo.
- Samee xeerar fudud.
- Sii ilmahaaga ihtimaam wanaagsan ee kusaabsan in uu si fiican u dhaqmo.



Horumarka Maskaxda Caafimaadka Leh




Caafimaad wanaagsan iyo xiriiro wanaagsan ayaa muhiim u ah horumarka maskaxda caafimaadka leh. Kula hadal ilmahaaga luuqadaada hooyo. Barashada labbo ama ka badan oo luuqadood waa mid u wanaagsan maskaxda.

Loo Diyaariyey in uu Wax Barto

Ku caawi caruurta in ay wax bartaan maalin kasta adiga oo:

- U sameeyo hawlo joogto ah intiiba aad awoodid sida (ciyaarida, wax cunid, qubeysiga, hurdada).
- Ilaaliya hidi iyo dhaqanka qosyka sida (muusigada, sheekooyinka, dabaal degyada, luuqada hooyo).
- Waqti ku qaata si wadajir ah samaynta waxyaabaha (diyaarinta cuntada, dhaqida suxuunta, ciyaarida ciyaaraha, iyo heesida).
- La hadlida iyo dhagaysiga ilmahaaga.



Waxbarashada Dareenka Badan

Caruurta waxay u baahanyihiin in ay isticmaalaan dhammaan jirkooda si ay wax u bartaan (taabashada, hadlida, dhagaysiga, dhadhaminta, araga, urinta).


Ha u oggolaanin caruurta jira 2 sanno in ay daawadaan Teleefiishanka; waxay dhib u keenaysaa horumarka maskaxda.

Xad u samee waqtiga ay Teleefiishanka ku daawadaan caruurta ka weyn 2 sanno iyo ku ciyaarida ciyaaraha kombuyuutarka.

Fiiri waxa ay daawadaan si aad u habsatid in ay caruurta ku habboontahay waxa ay daawanayaan.



Waxbarashada Xiliga Hore iyo Diyaar u Noqoshada Dugsiga



Waxa ay caruurta ku bartaan laga bilaabo dhallashada illaa 5 sanno ay ka gaaraan aad ayay muhiim ugu yihiin guusha mustaqbalkooda ay ku guuleystaan dugsiga.

- Waalidiintu waa macalimiinta ugu horeysa uguna fiican ee caruurta. Waxay baraan caruurta xirfado muhiim ah markasta oo ay waqti la qaataan.
- Xiriirkooda wanaagsan ee laga bilaabo dhallashada illaa ay ka gaaraan 5 sanno waxay ku caawinaysaa caruurta in ay diyaar u noqdaan dugsiga.
- Caruurta ku leh xirfado xoogan luuqadooda hooyo ayaa ah kuwa sida fiican wax uga keena dugsiga.

Dhakhtarka ilmahaaga wuxuu kugu caawin karaa in aad oggaatid sida uu ilmahaagu u korayo waxna u baranayo.



Horumarka Dareenka iyo Bulshada


Caruurta waxay wax ka bartaan xiriirada ka ahaada xiriiro jaeceyl oo lala sameeyo waalidiinta iyo dadka kale ee waaweyn. Caruurta sheegi kara dareemahooda, maarayn karaan dareenkooda, oona la dhaqmi kara dadka kale ayaa ah kuwa sida wanaagsan ugu guuleysta dugsiga iyo noloshaba.

Caruurta waxay u baahanyihiin:

- In ay oggaadaan waxa la filanayo.
- In ay bartaan sida loo sheego dareemahooda loolana dhaqmo dadka kale (sida dejinta, la ciyaarida dadka kale, in la isdhaafsado, in la isla wadaago, in la caawiyo dadka kale, in la raaco xeerarka fudud).
- In ay maqlaan ayaga oo lagu ammaanayo in ay waxyaabuhu u samaynayaan si wanaagsan.
- In ay maqlaan oona arkaan in dadka waaweyn ay isticmaalaan dhaqamo wanaagsan.



Waxbarashada Xiliga Hore iyo Diyaar u Noqoshada Dugsiga



Horumarinta Luuqada iyo Farbarashada

Lag bilaabo dhallashada illaa 5 sanno jir, caruurta waxay bartaan muhiimada dhagaysiga iyo xirfadaha hadalka. Xirfadahaan waxay ku caawin doonaan xiriirka ay la sameeyaan dadka kale iyo barashada sida wax loo qoro waxna loo akhriyo. Caruurta waxay ka faa'ideystaan barashada iyo dhisida luuqadooda hooyo. In lagu hadlo luuqado badan waxay faa'iido u leedahay horumarka maskaxda caruurta.


Laga bilaabo dhallashada illaa 3 Sanno

- La hadal ilmahaaga maalinta oo dhan.
- Dhagayso ereyada iyo dhawaqa codadka uu ku hadlo ilmahaaga. Ku celi codadka iyo ereyada uu sameeyo ilmahaaga.
- Bar ilmahaaga ereyo cusub adiga oo ka hadla waxyaabaha kusaabsan waxa aad samaysid maalinta oo dhan.
- Isticmaal heeso, codad heeso, iyo ficilo si aad u bartid ilmahaaga luuqadaada.
